



Benson Polytechnic High School



Waa in xirfadahaaga Dugsiga Benson ay kor ku kacaan. Dugsiga Sarre ee Benson waa iskuul lagu barto afar sano Xirfadaha Waxbarashada Farsamada Gacanta oo aad muhiim u ah, kaasi oo leh manhaj khaas ah; iyada oo iskuulkani la aasaasay sanadkii 1917. Haddaba iskuulka Benson wuxuu bixiyaa waxbarasho ta'yadeedu ay aad u sareeyso kuwaasi oo ardayda siiya tababaro farsamo gacmeed una diyaariya sidii ay u tegi lahaayeen jaamacadaha iyo xirfado sarreeya oo shaqooyinka lagu helaa mushaharo wanaagsan oo la jaanqaadaya qarnigani 21naad.

Waa lagama maarmaan marka xirfad la rabo inaad meel sare ka gaarto in la helo barayaal aqoon sarre u leh oo lagu lammaaneeyey xirfadlayaal aqoontooda farsamo sareeyso oo addeegsanaya manhaj muhiim ah. Ardaydu waxay noloshooda ka bilaabaya sidii ay u ogaan lahaayeen xiisahooda, iyaga oo marka ay qalinjabinayaan wata xirfadihii lagama maarmaanka ah u ahaa sidii ay ugu shaqo tegi lahaayeen wixii ay takhakhuska gaarka ay ku sameeyaan /ama haysta dhibcihii aqooneed ee lagu gali lahaa jaamacada/kulliyada. Dugsiga Benson sidoo kale, wuxuu siiyaan ardayda taageero kala duwan oo ku taageerayo sidii ay u gaari lahaayeen halka ay higsanayaan ee hamigoodu yahay haddii ay tahay qof ahaan iyo xirfadahooda shaqaba, waxaana ka mid ah barnaamijyada Xarunta Benson Wellness, diyaargarowga shaqada iyo xirfada iyo AVID oo jaamacada ka caawiya.

Dhismaha Dugsiga Benson oo dhan 9 iikar kuna yaala gudaha magaalada Portland geesta bari oo leh goobo badan oo ganacsi. Waxaa la rajeynayaan ay xaggaaga 2021 ka bilaabanto dib u cusbooneysiin dhammeystiran , iyada oo la dhammeystiri doona sanadka 2024. Mashruuca dib u cusbooneysiintu wuxuu si dhammeystiran dib u habeyn ugu sameyn doonaa goobihii waxbarashada iyada oo diirada la saarayo sidii loo keydin lahaa in aan meesha laga saarin taariikhdi dhismaha ee iskuulka. Si aad wax badan uga ogaato qorsheynta iyo naqshada Benson waxaad gujisaa Xafiiska Dib U Cusbooneysiinta Iskuulada www.pps.net/Page/1838.

Machadka Warshadaha iyo Injineernimada

Hoygan waxbarasho ee Benson wuxuu bixiyaa casharo waxbarasho oo tayo sare leh, sidii loo dhisayey xirfada iyo tababaro saddex xirfadood oo aad loogu baahan yahay , mid kastana lagu sameeyo takhakhusus qoto dheer oo kalana duwan.

Akamdayada Teknoolijiga Isgaarsiinta

- Sawir-qaadista/Farsamada Fiidiyowga
- Naqshadeynta Web/Fiidiyaasha Web
- Warbaahinta Raadiyowga KBPS (Raadiyow dadweyne oo ay ardeydu hawshiisa wado)

Akamdayada Sayniska Caafimaadka

- Kalkaaliye Caafimaad/Xirfadlayaal
- Kalkaaliye Caafimaad Sare/Kalkaaliye Caafimaad Sare haysta Laysanka
- Kalkaaliye Ilkaha

Akamdayada Injineerinka iyo Warshadaha

- Teknoolijiga Baabuurka
- Teknoolijiga Dhisida Dhismayaasha (waxa ku jira barnaamijka sida guryaha loo dhiso)
- Teknooliyada Korontada
- Teknooliyada Wax Soo Saarka
- Teknooliyada Injineerinka /Naqshadeynta
- Teknooliyada Joomateriga/Teknoolijiyada Aljebra
- Injineerinka Barashada Kumbuyuutar Sayniska
- Koorsooyinka Injineernimada Ka Horreeya



“Dugsiga Farsamada ee Benson ardaydiisu waa arday loo diyaariyey sida ay diyaar ugu noqon lahaayeen nolosha runta ah ee shaqaalaha waqtiga casriga ah. Shahaadadda Dibloomada ee Benson waxa ay iridaha u fureysaa ardaydani sidii ay u bilaabi lahaayeen safarkooda dheera ee noloshooda ayna uga dhabbeyn lahaayeen mustaqbalkooda nololeed.”

—Curtis Wilson Jr.,
Maamulaha



Mustaqbal dhaqaale fiican bixinaya

Celceliska mushaharada takhakhuska xirfadaha ay ardaydu ka bartaan Benson ay qaataan sanadkii ee nawaaxiga magaalada Portland*:

- Caafimaadka/Kalkaalayaha Ilkaha: \$40,000 - \$45,000
- Shaqaalaha Dhismaha: \$44,000
- Graphic Designers: \$60,000
- Farsamada Baabuurta: \$52,000
- Farsamada Korontada: \$75,000

*WorkSource Oregon

Higsigayagu wuxuu yahay

Shaqaalaha Dugsigan Benson waxay rumeysan yihiin in ardeydu ay:

- ku isticmaalaan fikradaha waxbarasho xaaladaha dhabta ee dunida.
- isku dhafaan waxbarashadood ka kooban farsamada gacanta iyo waxbarashadooda.
- Raadiyaan xirfad iyo qeybaha farsamada,ka dibna doortaan takhasuskooga.
- Waayo-aragnimo u yeeshaan fasalka waxbarashada iyo goobaha shaqada.
- Ku qalan-jabiyaan xirfad heerkoodu sareeyo iyo xirfadaha kulliyada.
- ku shaqeeyaan mutadawacnimo, iyaga oo isticmaalaya xirfadahooda iyo xirfadaha farsamo.

Ardeydayadu

- **Kala Duwanaashaha** - Dugsiga Benson wuxuu ku jiraa dugsiyada sarre ee Waqooyi-Galbeed ardaydiisu ay sida weyn u kala gedisan tahay dhalashadoodu meelaha ay ka soo jeedaan, tiro isle'eg oo cadaan ah, Laatiino, Maraykan-Afrikaanka, iyo ardayda Aasiyaanka ah. Dugsiga Benson waa iskuul leh jawi la isku ixtiraamo iyo faham u diyaaraya ardayda sidii ay meel fiican uga gali lahaayeen bulshada adduunka. Ardayda Iskuulku waxa ay sanadkiiba qabtaan kulan ay ku xusayaan kala-duwanaanshaha ardayda iyo hibadooda ilaahay siiyey iyaga oo ku muujiya sanad-dugsiyeedka.
- **Ka qaybqaadashada** - Benson wuxuu bixiyaa barnaamijyo hawleed oo kala gedisan ayna ka mid yihiin ciyaaraha: Football, Kooxda Taageerta Ciyaaryahanka, Orodada Dhaadheer, Kubada Cagta, Kooxda Qoob Ka Ciyaarka, Kubada Laliska, Kubada Shabaqa, Legdinta, Baseball, Softball, Kubada Miiska, Orodada Gaagaaban, iyo ciyaarta Golf. Ururada Hoggaaminta: National Honor Society, Xirfadaha USA, iyo Shaqooyinka Ardeyda Caafimaadka Maraykan ama HOSA. Kooxaha Ardeyda: Robotics, Kala Duwanaanshaha, Key, Mecha, Ururada Ardeyda Madow, ururada tartansiiya farsamada iyo kuwo kale oo badan. Barnaamijyada Dhismaha Guryaha, iyada oo ay ardeydu dhisaan guri qoys ku noolaan karo, Dugsigan Benson waxaa ka go'an bulshadiisa wax ku soo biiriyo.
- **Kulliyada-iyo xirfada-manhaj gaar ah-** Ardeydu waxay ka heli karaan labada kulliyadood ee PCC iyo MHCC 34 dhibcood oo lammaane ah fasalada kulliyada. In ka badan saddex meelood-labo ahaan ardeyda Benson waxay ka galaan kulliyada labo sanadood ah ama jaamacad afar sanadood ah isla marka ay ka qalin-jabiyaanba. Boqolkiiba 15 kale oo ka mid ah ardeydaasi wax ka bartay dugsiyada farsamada/xirfadaha, iyadoo qeyb ka mid ahi ay shaqo tagaan ama ay raadsaan badiilo kale.

“Takhakhuskii aan ku sameeyey Naqshadeynta Dhismayaasha ee dugsigan Benson wuxuu iga caawiyey qorhseynteydii aan dooranayey in aan raadsado xirfada naqshadeynta dhismayaasha. Waxaan bartay sida loo qabto shaqada ee saxda ah iyo in aan ka qeybqaato kooxda shaqada wada. Iminka waxaan dib ugu noqday Dugsigii Benson si aan wax uga dhigo, ka dib markii aan ka soo shaqeeyey shirkadaha naqshadeyna, waxaan jiiika soo socda u gudbinayaa aqoontii aan soo bartay.”

— Tammy Hite,

Naqshadeeye, macalin bara sida wax loo sawiro iyo ardeydii ka baxday Benson

“Dugsigan Benson wuxuu maskaxdeyda u furay in aan go'aansado in aan barto xirfado ka faro badan intii aan filayey. Waxaan mar walba jeclaa inaan noqdo xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka, laakiin Benson wuxuu iga caawiyey in aan ogaado in aan leeyahay hibooyin kale oo aanan hore u ogeyn inaan leeyahay. Dugsigan Benson waa dugsi ay yaalaan fursado fara badan.”

— Kim Le,

Fasalka 2017



Dugsiga Sare ee Benson

546 NE 12th Ave.

Portland, OR 97232

Telefoon: (503) 916-5100

www.pps.net/schools/benson

Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay kor u qaadaan shaqaaleysiinta iyagoo ah shaqaaleysiiyey fursadihiisa shaqo loo siman yahay. 2019